

HÄNG MED

SPRÅKTÅGET!



**QABSO
TAREENKA
LUQADDA!**

Somali

Inaad isla akhrisaan oo isla eegtaan buugaagta carruurtaada waxay noqon kartaa mid farxad iyo raaxo labaduba leh - sidoo kale waxay dhiirigelin siisaa xirfadahooda hadalka iyo luqadda. Markaad akhrido oo aad ka hadasho sheekooyinka ku yaala buugga, waxaad sidoo kale ka caawinaysaa cunuggaaga inuu kobciyo fikirkiisa, foojignaantiisa iyo xirfadiisa wada-xiriirka.

Isla akhriya

Luuqadu way kobocdaa intaan la macaamilayno dadka kale. U oggolow cunugaagu inuu firfircoonaado markaad wax isla akhrineysaan oo fiiro gaar ah u yeelo ereyadiisa, dhawaaqyadiisa iyo wax meedaarkiisa. Tartiib u akhri sida cunuggaaga oo kale, ka warqab waxa xiisa galiya oo sug fal-celintiisa akhrintana waxay si gaar ah ugu caawin doontaa kobcinta luqadda.



2 Xulashada buugaagta

Xulo buugaag cunuggaaga uu u arko kuwa cajib ah oo xiisa leh kuna habboon heerka luqadda cunuggaaga. Haddii ay kugu adkaato inaad xulato, waxaad had iyo jeer waydiin kartaa shaqaalaha maktabaddaada. Waxaad si bilaash ah maktabadda uga amaahan kartaa buugaag.



3 Ka dhigista akhriska mid raaxo leh

Isku day inaad hesho waqti aad ku wada aqrisaan oo ku eegtaan buugaagta maalin walba meel jawi dagan leh. Isla fariista oo isku dhawaada si jirkiina iyo ishiina isku qabtaan, oo iska hubiya inaan laidin carqaladayn. Qasab ma aha inaad aqriso bogga koowaad ilaa kan u danbeeyo ee buugga; si dagan adiga oo u fadhiya oo warqadaha buuga kolba gadinaya si taxaddar lehna u akhriyaya wax kasta oo xiisa galiya cunugaagga ayaa ah hab wanaagsan oo lagu kobciyo luqadda.

Fiiri sawirrada oo ku macnee erayadaada

4

Had iyo jeer way fududahay inaad hesho feejignaanta cunugaagga haddii aad ku sharaxdid sheekooyinka iyo sawirrada ereyadaada, adiga oo adeegsanaya codad, dhawaaqyo iyo tilmaamo kala duwan. Waqti sii aad ku tilmaanto oo aad kaga hadasho sawirrada. Tani waxay ka caawineysaa cunuggaaga inuu la socdo sheekada oo waliba waxay siinaysaa fursado badan oo uu ku barto ereyo cusub.



5

Isla wada sheekaysta

Waa inaad siisaa cunuggaaga fursad uu kaga qeybqaato markaad isla wada akhrineysaan; tusaale ahaan, adiga oo u oggolaanaya inay buuxi-yaan ereyada iyo jumladaha oo ay ka jawaabaan su'aalaha. Waqti sii aad ku xaqiijiso oo aad ku faafaahiso waxa ilmahaagu uu dhaho. Hanankan, waxaad ku muujineysaa sida cunuggaaga uu ku kobcin karo luuqaddiisa. Markaad aqriso buug dhowr jeer, cunugaagga wuxuu awoodi karaa inuu u sheego sheekada oo dhan isagoo ku saleynaya waxa ay ka hadlayaan sawirada.



6

Wax ku akhri, ku hees oo wax ku sheeg dhamaan luuqadaha cunugaaga

Cilmi baaris ayaa muujisay in carruurta wax loo akhriyo ay leeyihiin aqoon ereyo oo ballaaran iyo in carruur yar ay isku mar baran karaan dhowr luqadood. Sidaas darteed wax ku akhri, ku hees oo ku sheekeey dhamaan luuqadaha cunugaaga! Tani waxay waxtar u leeda- hay kobcinta luqadda cunugaaga.

7

Raac Tareenka Luuqada

Buugaagta carruurta waxay gacan ka gaysanayaan inaad ka caawiso cunuggaaga inuu yeesho xirfadaha luqadda sida fahamka, aqoonta erayada, naxwaha iyo ku dhawaaqidda. Haddii aad rabto talooyin ku saabsan buugaagta habboon, weydii maktabaddaada liiska buugasha la akhrinayo ee Språktåget!

Waxaad si bilaash ah maktabadda uga amaahan kartaa buugaag. Soo dhowow!

Språktåget (Tareenka Luuqadda) wuxuu bixiyaa talooyin iyo tilmaamo ku saabsan dhiirigelinta hadalka cunugga iyo kobcinta luqadda waalidiinta iyo dadka kale ee xiriirka dhow la leh carruurta. Tareenka Luuqadda wuxuu ku istaagaa boosteejooyin kala duwan halkaas oo caruurta ay ku kobcin karaan dhinacayo kala duwan oo kamid ah xirfadaha luuqadooda. Qaarkood waxay u baahan doonaan inay istaagaan hal boosteejo in muddo ah, halka kuwa kalena si dhakhso leh ay ula jaan qaadaan. Qof kasta ayaa raaci kara Tareenka Luqadda!

Språktåget (tareenka luqaddu) waa iskaashi ka dhexeeya hay'adda Biblioteksutveckling ee Jämtland Härjedalen, maktabadda, daweynta hadalka, daryeelka caafimaadka caruurta iyo ka qaybgalayaal badan. Qoraalka waxaa soo saaray dhakhaatiirta hadalka hadalka ee Elvira Ashby iyo Linnea Anderberg oo kaashanaya maktabadda gobolka Stockholm.